



**Seattle
Public
Utilities**



King County

Noqo RainWise

Maaree biyaha roobka ee gurigaaga

Waa maxay
dhibaatadu?

Roob kasta oo da'a, roobku wuxuu wasaqda ka soo qaadaa saqafyadeena, wadooyinka la maro iyo meelaha kale ee adag dushooda isaga oo gala webiyada yar yar ee degaankeena, Lake Washington and Puget Sound. Inta lagu jiro robabka waaweyn, heerka "biyaha roobkan" wuxuu keeni karaa buux-dhaafka bulaacada, isaga oo nabaad guurin kara meelaha taagaga ah iyo iyo hareeraha dooxyada. Beeraha roobka ku baxa iyo taangiyada biyaha lagu keydiyo'cisterns' waxaad caawimaad ka geysan karaan maareynta biyahan roobka marka aad wax caawiso.



Qandaraaslayaasha RainWise waxay dejiyaan naqshada beeraha roobka ku baxa ee ku habboon baahiyaha gaarka ah ee goob kasta.



Tallaabooyin lagu noqonayo RainWise

Booqo www.rainwise.seattle.gov

1. **Fiiri u qalmitaankaaga** adiga cinwaankaaga ku qoraya si aad u ogaato waxa ka soconaya hantidaada iyo haddii aad heli karto lacag dib la iskugu soo celinayo 'rebate'.
2. **Hel dalabyo** ka socda qandaraaslayaasha kuwaasi oo laga helayo qaybta ay ku qoran tahay Hel Qandaraaslayaal "Find a Contractor" ee laga helayo website-ka. Dooro qandaraaslahaaaga.
3. **Qandaraaslahaaaga ayaa kuu sameyn doona jadwal ah baaritaan hore 'pre-inspection' ka dibna sameyn doonaa wax rakibaada.**
4. **Qandaraaslahaaaga ayaa qorsheyn doona kormeer kama dambeys ah oo la sameeyo.** Qofka fiiranaya RainWise ayaa xaqijjin doon in rakibaadaada si sax ah loo sameeyay.
5. **Hel lacagtaada dib la iskugu soo celinayo 'rebate'!** Soo gudbi xirmadaada lacagta dib la iskugu soo celinayo 'rebate package' isla markaana lacagtaada dib la iskugu soo celinayo 'rebate' ku hel muddo 6-8 toddobaad gudahood ah.

Wixii

macluumaad ee
dheeraad ah booqo

www.rainwise.seattle.gov

Su'aalah? Email u dir rainwise@seattle.gov
ama wac Khadka Beerta 'Garden Hotline'
ee **206-633-0224**.

LACAGTAADA DIB LA ISKUGU SOO CELINAYO 'REBATE' ee

RainWise

waxay bixin doontaa lacagta beeraha roobka ku baxa iyo taangiyada biyaha lagu keydiyo 'cisterns'

Barnaamjika RainWise wuxuu bixiyya lacagaha dib la iskugu soo celinayo 'rebates' oo lagu daboolo inta badan ama dhammaan kharashyada rakibaada taangiyada biyaha lagu keydiyo 'cisterns' iyo beeraha roobka ku baxa ee ku yaala hantidaada. Si aad u hesho lacagta dib la iskugu soo celinayo 'rebate', waa in aad u ku nooshahay meel ay ka jirto buux-dhaafka wasakhda bulaacada ee isku jira. Waaanu kaa caawin doonaan ga'aaminta haddii hantidaadu u qalanto. **Qiyaasta lacagta dib la iskugu soo celinayo 'rebate' waxay ahayd \$4,000.**

Taangiga biyaha lagu keydiyo 'cistern',
beerta roobka ku baxda ama labodoodaba... Sidee baad u noqon doontaa

RainWise?

Sidee bay taangiga biyaha lagu keydiyo 'cistern' ee RainWise u shaqeeyaa?




Taangiga biyaha lagu keydiyo '**cistern**' waa weel weyn oo dhulka kor uga kacsan oo lagu ururiyo biyaha ka imaanaya saqafka. Waa sida foostada biyaha oo weyn waxayna qaadi kartaa 200 ama ka badan oo gallons. Inta lagu jiro xilliga jilaalka, taangiyada biyaha lagu keydiyo 'cisterns' ee RainWise waxay ururiyaan biyaha waxayna si tartiib ah ugu sii daayaan nidaamka bulaacada. Inta lagu jiro xagaaga, biyaha ayaa la ururin karaa isla markaana loo isticmaali karaa in wax lagu waraabiyo



Taangiyada biyaha lagu keydiyo 'cisterns' waxay ku yimaadaan iyaga oo l eh qaabab kala duwan, cabbir iyo midabyo.

Taangiga biyaha lagu keydiyo 'cistern'



Taangiyada biyaha lagu keydiyo 'cisterns' ee RainWise waxay si gaar ah ugu qalabaysan yihiin in ay biyaha u oggolaadaan in ay si tartiib u soo dareeraan inta lagu jiro bilaha jilaalka. Tani waxay xaqiijinaysaa in taangiga biyaha lagu keydiyo 'cistern' uu maran yahay ka dib marka roob kasta oo weyni da'o isla markaana ay diyaar yihiin in roob dheeraad ah laga buuxiyo.

BEERTA ROOBKA KU BAXDA

Isku darka beerta roobka ku baxda iyo carrada

Dhulka
hadda jira

Biyaha ayaa si
tartiib ah u gala dhulka



Beeraha roobka ku baxaa ku jiri kara dhir kala duwan iyo naqshadeynta aad doorato.

Qandaraaslaho RainWise ayaa kaa caawin doona in aad go'aansato mida xalka ah ee sida wanaagsan ugu shaqaynaya hantidaada, kharashka iyo tirada lacageed ee lacagtaada dib la iskugu soo celinayo 'rebate' ee suurtagalka ah.



Seattle
Public
Utilities



King County

Isaga oo kaala shaqayn doona in aad maareyso biyaha roobka ee guriga.